


Pulmonary Valve Replacement (PVR)

Beddelaadda Daboolka Wadnaha ama PVR



Ogeysiis:

The Children's Heart Clinic, 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404
612-813-8800 * Toll Free: 1-800-938-0301 * Fax: 612-813-8825
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404

Beddelaadda Daboolka Wadnaha ama PVR Pulmonary Valve Replacement (PVR)

Beddelaadda daboolka sambabka waxaa lagu hagaajinayaa daadashada dhiigga, iyo shaqada sambabka. Waxaa jira sababo badan oo loogu baahan yahay in la beddelo daboolka sambabka. Marar badan, qalliinkan waxaa la sameyn karaa sannado ka dib hagaajinta hore ee tuubbo ilmaha loogu geliyey oo ah Qulqulka Dhiigga oo aan Caadi Ahayn ama ka dib waxqabadka dhuubashada (ciriirka) sambabka. Mararka qaarkood, bukaanka aan qalliinka ahaan wax laga qaban goor hore waa in laga beddelo daboolka sambabka, haddii loo baahdo. Beddelaadda ah daboolka sambabka ayaa sidoo kale la sameyn karaa si loogu saxo daloolka sambabka ee ay ku dhacday dhuubashada (ciriirka). Beddelaadda daboolka sambabka waa hagaajin ah qalitaan ama sheybaarka tuubagelinta.

Qalliinka beddelaadda: Daboolka sambabka waxaa badanaa lagu beddelaa nooc ah macmal oo noole, ama mid ah nooc la soo farsameeyey. Badanaa, nooca daboolka la isticmaalo waa nooc ah macmal oo noole, oo ah xuub doofaar oo loogu rakibayo kabiid ahaan. Furista bartanka shafka (jeexid ah qeybta dhexe ee shafka) ayaa la sameynayaa iyadoo la marayo jeexid ah qalliin hore, haddii uu jiro. Waxaa ilmaha lagu xirayaa wadne iyo sambab ah macmal (mashiin ah wadne-sambab). Waxaa la furayaa right ventricular outflow tract (dhuunta qulqulka qalbaca hoose ama RVOT), oo waxaa la soo bixinayaa tuubada sambabka. Dabool macmal noole ah oo le'eg (doofaar) ayaa loo diyaarinayaa oo markaas lagu tolayaa. Mararka qaarkood, xuub lo' (sac) ka (kiish ku wareegsan wadnaha) ayaa loo isticmaalaa in lagu kordhiyo halbowlaha sambabka iyo meesha RVOT daboolka la geliyey.

Beddelka nooca kateetaraaha: Marka uu ilmuhu buuxiyo shuruudaha, beddelaadda daboolka waxaa lagu sameynayaa shaybaarka iyadoo loo sii mari doono xididdada saracda. Dhuunta qulqulka dhiigga qalbaca midig, Harmony™ (Medtronic) ama Alterra (Edwards) ayaa loo dhex gelin doonaa. Goor hore marka qalliin ahaan loogu soo geliyey dabool ama marin ah halbowlaha midig ee sambabka, Melody™ (Medtronic) ama Edwards-Sapien S3 ayaa loo gelin karaa.

Hawlgalka Caadiga ah ee Qalliinka Ka-dib:

- Wakhtiguu Qaadanayo Qalliinka: 4 saac
- Qalabka Tuubooyinka: Waxaa ilmaha badankooda lagu soo celinayaa Xarunta Daryeelka Wadnaha ka dib qalliinka oo waxaa lagu xirayaa tuubo ah neefsashada, mid halbowle oo lagula soconayo cadaadiska dhiigga, mid kale oo ah xididdada (mid ah faleebbe daawo ah laga qaato iyo in dhiig laga qaado), faleebbe bannaanka ah, tuubooyinka xabadka ah oo dheecaanka looga daadinayo, kateetaraaha Foley oo ah kan kaadidu geleyso, iyo mararka qaarood kala fogeynta xargaha wadnaha oo meelgaar ah.
- Sookabashada Caadiga ah Qalliinka Ka-Dib: Tuubada neefsashada ayaa badanaa laga saari doonaa wax yar ka dib qalliinka. Tuubada halbowlaha badanaa waxaa laga saarayaa maalmo ka dib, marka laga joojiyo faleebbaha. Tuubada xididdada bartamaha waxaa laga bixinayaa marka laga joojiyo ee aan loo baahneyn daawada iyo dhiigga laga qaadayo faleebbaha ama IV. Tuubooyinka xabadka waxaa laga saaraa 24 ilaa 48 saac ka dib qalliinka, markuu yaraado dheecaanka soo baxaya.
- Muddada Seexinta Isbitaalka: Wuxuu ilmuhu isbitaalka joogayaa badanaa 4 maalmood ka dib marka loo geliyo MVR.

Caadiga Ahaan Muddada Tuubagelinta Kadib:

- Waa in hal habeen lagu hayo Xarunta Daryeelka Wadnaha. Subaxa xiga ayaa la saarayaa raajada xabadka, sawir ah xididdada iyo wadnaha iyo EKG. Haddii xaalku caadi yahay, muddada joogitaanka caadi ahaan waa 24 saac.

Qaadashada Daawooyinka Guriga: Carruurta waxa ay u baahan karaan hal daawo ama in ka badan in ay guriga u qaataan ka dib PVR sida:

- Daawada biyaha saarta (Lasix) si looga xakameeyo dareeraha
- Daawada dhiigga jilcisa (Aspirin) looga hortago xinjirowga
- Antibiyootigga bakteeriyada ilkaha ayaa loo qori karaa.